



### Ujeedooyinka Koonsada: ▼

Kordhinta  
aqoonta sida loo  
qorsheeyo banaanbax  
nabad ah

Aasaaska  
muhiimadda  
qorsheynta  
munaasabadda

Bilaabidda in la  
horumariyo qorshe ku  
haboon u diyaar  
garowga  
munaasabadda,  
qabashada  
munaasabadda, iyo  
qiimeynta arrimo dhici  
karo, si loo sugo  
nabadda dadka  
munaasabadda.

## Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeegga Xiriirka Bulshada Yareynta Khatarta Xiliga Munaasabadda Qorsheynta Diyaar Garowga

**Barnaamijka tababarka ee Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeegga Xiriirka Bulshada (CRS), Yareynta Khatarta Xilliga Munaasabadda: Qorsheynta Diyaar Garowga ay wadaan qkhubaro ayaa loogu talagalay inuu ka caawiyo nabad sugidda, saraakiisha dowladda, qabanqaabiyayaasha munaasabadda, iyo dadka tabarrauca ku shaqeeya inay qorsheeyaan sugidda nabadda munaasabadaha. Koorsadan tababarka ah waxay dadka daneeya arrintan ka caawisaa siday u ogaan lahaayeen una yareyn lahaayeen khatar gelinta nabadda dadka kahor inta munaasabadda la billaaban.**

Mararka qaar bulshooyinka waxay dareemaan xiisado ay keentay kala duwanaanta jinsiyada, midabka, asalka wadanka, sinjiga, sinjiha qofka isku tiriyo, nooca galmada ay doorbidaan, diinta, iyo naafanimada, iskudhacayada waxaa lagu arki karaa banaanbaxyada. Barnaamijkan tababarka waxuu waxtar u leeyahay in si nabadeysan loo banaanbaxo. Ayadoo la hirgelinayo sida ugu wanaagsan ee loo qorsheeyo diyaar garowgan, bulshada ayaa qeyb ka qaadan karto hubinta in la sugo nabada munaasabadaha.

### Dulmarka Guud ee Barnaamijka ▼



**Markii iskudhac ku imaado bulshooyinka ee ku saleysan kala duwanaanta jinsiyada, midabka, asalka wadanka, sinjiga, sinjiha qofka isku tiriyo, nooca galmada ay doorbidaan, diinta, iyo naafanimada, banaanbaxyo ayaa dhici kara, oo CRS waxay ka caawisaa xubnaha bulshada in loo tababaro hababka ugu fiican ee loo qorsheeyo xafad ammaan ah.**

#### Tixgelinta Qorsheynta Munaasabadda

Casharkan waxuu baaraa waxyaabaha la rabo sida alaabaha, ogalaashaha iyo macluumaadka la tixgeliyo marka la qorsheynayo munaasabad.

#### Dadka dowlada muhiimka ka qaata

Casharkan waxuu diiradda saaraa horumarinta qorshe ficil ee lagu ogaado dadka dowlada muhiimka ka qaata, in meel la saaro dadka masuuliyadooda iyo dowladooda, iyo in la siiyo tababarka iyo macluumaadka.

#### Qorsheynta Marxalada Munaasabadda

Casharkan waxuu dib u eegaa shanta marxaladood ee badanaa munaasabada – kahor munaasabadda, banaanbaxa iyo kala taga – waxuuna faahfaahiyaa qorsheynta iyo khatarta la xiriirta mid kasta.

#### Qorsheynta arrimaha dhici kara

Casharkan waxuu diiradda saaraa horumarinta in la qorsheeyo u diyaar garowga, ay kamid tahay isku duwida nabad sugida iyo qabanqaabiyayaasha munaasabadda.

## Waa Ayo CRS ▼

Waxaa lagu aasaasay sharciga Xuquuqda Shacabka 1964kii (Title X), waxaana lagu sii ballaariyay sharciga Kahortagga Dambiyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., ee 2009kii. CRS waa “Nabadoonka Mareykanka” u ah bulshada soo wajahday xiisado ama isku-dhac ku saleysan kala duwanaanta midabka, asalka, sinjiga, sinjiga uu sheegto, diinta, iyo naafonimada. Ujeedka adeegyada CRS waa inay kor uqaado awooda bulshada ay si gooni ah iyo wadajir ah uga hortagaan una xaliyaan iskudhac mustaqbalka ayadoo la isticmaalayo sida xalinta dhibaataada, aqoon kordhin, iyo ka shaqeynta xiriirka.

## Adeeyada iyo Barnaamijyada CRS ▼

CRS waxay siisaa bulshooyinka la kulmo xiisad, barnaamijyo gogoldhig u ah fahanka, hagaajinta wadashaqeynta, iyo kahortagga iska hor imaad mustaqbalka. Shaqaalaha CRS waa xirfadlayaal dhexdhexaadiyaal, tababarayaal, iyo la taliyayaal khibrad u leh isku keenka xubnaha bulshada si ay u hagaajiyaan awoodooda xalinta iskudhac jiro iyo ka hortagaan iskudhac mustaqbalka ah.

## Xagee ka Shaqeynaa ▼

**Xarunta CRS** 📍  
Washington, DC

## Xafiisyada Gobolada CRS 📍

**New England**  
Boston, MA

**Waqooyi-bari**  
New York, NY

**Atlantiga-Dhexe**  
Philadelphia, PA

**Konfurbari**  
Atlanta, GA

**Galbeedka-dhexe**  
Chicago, IL

**Konfur-galbeed**  
Dallas, TX

**Dhexda**  
Kansas City, MO


**Buuraleyda**  
Denver, CO

**Galbeedka**  
Los Angeles, CA

**Waqooyi-galbeed**  
Seattle, WA

## Xafiisyada CRS ee Goobaha Shaqada 📍

Miami, FL   Houston, TX  
Detroit, MI   San Francisco, CA



## Naga hel, nagala soo xiriir ▼

[www.justice.gov/crs](https://www.justice.gov/crs)



facebook.com/DOJCRS/



@DOJ\_CRIS



askcrs@usdoj.gov



202.305.2935

Wixii macluumaad dheeri ah ee barjaamijkan ama adeegyada kale ee Adeegga Xiriirka Bulshada: fadlan la xiriir xafiiska deegaankaada:  
<https://www.justice.gov/crs/about-crs/regional-and-field-offices>